Oregon Health Authority
QAYBTA CAAFIMAADKA DADWEYNAHA

Su’aalaha Badanaa la Iswaydiiyo ee baraha iyo shaqaalaha

(La Cusboonaysiiyey 1/28/2021)

S1. Ayaa ku jiraya kooxda “baraha” marka la eego ujeedooyinka tallaalka COVID-19?

J1. Laga bilaabo Janaayo 25, 2021, barayaasha iyo shaqaalaha dugsiyada K-12 ee dadweynaha iyo kuwa gaarka loo leeyahay, barayaasha carruurnimada hore, bixiyayaasha iyo shaqaalaha daryeelka ilmaha waxay uqalmaan inay helaan tallaalka COVID-19. Fadlan tixraac liiska dhammaystiran.

S2. Halkee barayaasha iyo shaqaalaha dugsiyada dadweynaha iyo kuwa gaarka ah ee K-12 lagu tallaalayaa?

J2. Waxaad ka heli doontaa macluumaad saraakiisha dugsiga ama loo-shaqeeyayaasha kaasi oo kusaabsan fursadaha tallaalka. OHA waxay si dhaw ula shaqaynaysaa Waaxda Waxbarashada ee Oregon iyo saraakiisha waxbarashada/dugsiyada ee kale iyo saaxiibada si ay u hubiso saraakiisha K-12, hoggaamiyayaasha, barayaasha iyo shaqaaluhu inay helaan macluumaad wakhti ahaan munaasab ah oo kuwii u dambeeyey ah.

Booqo covidvaccine.oregon.gov ama la xiriir 211 adigoo u diraya iimayl, farriin qoraal ah ama toos taleefanka uga wacaya si aad u hesho macluumaadkii ugu dambeeyey.

S3. Halkee barayaasha/shaqaalaha carruurnimada hore iyo bixiyayaasha/shaqaalaha daryeelka ilmaha lagu tallaali karaa?

J3. Waxaad ka heli doontaa macluumaad saraakiisha dugsiga ama loo-shaqeeyayaasha kaasi oo kusaabsan fursadaha tallaalka. Bixiyayaasha daryeelka ilmaha ee guriga iyo daryeelayaasha kale ee mutaystay waxay heli doonaan xiriir toos ah oo uga yimaadda saraakiisha gobolka iyo deegaanka. OHA waxay si dhaw ula shaqaynaysaa Qaybta Waxbarashada Hore ee Oregon iyo loo-shaqeeyayaasha waxbarashada carruurnimada iyo daryeelka ilmaha ee kale, saraakiisha iyo saaxiibada kale ee deegaanka si ay u hubiso bixiyayaasha daryeelka ilmaha iyo barayaasha carruurnimada hore inay helaan macluumaad wakhti ahaan munaasab ah oo ah kuwii u dambeeyey.

Booqo covidvaccine.oregon.gov ama la xiriir 211 adigoo u diraya iimayl, farriin qoraal ah ama toos taleefanka uga wacaya si aad u hesho macluumaadkii ugu dambeeyey.

S4. Halkee bixiyayaasha/barayaasha carruurnimada hore iyo shaqaalaha lagu tallaali karaa?

J4. Barayaasha carruurnimada hore iyo bixiyayaasha daryeelka ilmuhu hadda way mutaysteen, laakiin ilaa qaddarka talaalka ee dawladda fadaraalku bixinayso uu kordho, ma jirayo tallaal ku filan oo si dhakhso ah loogu tallaalo qof kasta. Waxaad ka heli doontaa tilmaamo saraakiisha dugsiga ama loo-shaqeeyayaasha, laakiin waxay qaadan kartaa dhawr toddobaad. Waa wax adag in la sugo laakiin waxaanu kaa codsanaynaa samir. Degmooyinka qaar waxa waajib ah inay dhammeeyaan tallaalka bulsho-waynta 1A kahor bilaabidda tallaalka waxbarashada.

S5. Ayaa masuul ka ah abaabulidda fursadaha tallaalka ee barayaasha?

J5. Maamulada caafimaadka dadweynaha ee deegaanku waxay si dhaw ula shaqaynayaan isbitaalada, nidaamyada caafimaadka iyo saraakiisha waxbarashada si ay u bixiyaan fursadaha tallaalka ee loogu talogalay barayaasha iyo bixiyayaasha daryeelka ilmaha. Degmooyin badan ayaa u horey u bilaabay inay u qorsheeyaan, halka kuwa kalena ay wali tallaalayaan bulsho-waynta 1A. Waxaanu kaa codsanaynaa inaad samir yeelato, sugto waqtigaaga, iyo inaad tilmaamo ka hesho dugsiga, waxbarashada, iyo saraakiisha gobolka iyo deegaanka.

S6. Haddii aan su'aalo ka qabo inaan uqalmo tallaalka iyo in kale, ayaan wici karaa/halkee ayaan tagi karaa?

J6. Wixii macluumaad dheeraad ah, tag chatbot-ka covidvaccine.oregon.gov (badhanka chatbot-ka waa "Let's get started(Aynu bilowno)" ama waxaa jira astaan ku taal geeska midig ee hoose), ORCOVID u dir 898211 si aad u hesho qoraal/SMS (fariin) cusbooneysiin ah (Ingiriisi iyo Isbaanish kaliya) ama emayl u dir ORCOVID@211info.org. Haddii aadan jawaabaha su'aalaha aad ka qabto tallaalka COVID-19 ka heli karin websaytka, farriinta qoraalka ah, ama iimaylka, xarunta wicitaanka ka wac 211 ama 1-866-698-6155, taasi oo shaqaysa laga bilaabo 6 g.h. ilaa 7 g.d. maalin kasta, xataa ciidaha. Wakhtiyada sugitaanku wuu dheeraan karaa maadaama ay wicitaanada fara badan yihiin. Waxa jira ikhtiyaar ah in dib laguu soo waco halkii aad sugi lahayd (Ingiriisi iyo Isbaanish ah). Tarjumaad bilaash ah ayaa loo heli karaa luuqadaha kale oo dhan. TTY: La hadal 711 ama wac 1-866-698-6155.

S7. Miyaa barayaasha dugsiga guriga iyo shaqaalaha waxbarashada guriga la tallaali karaa?

J7. Wakhtigan maya. Tixraac liiska dhammaystiran ee barayaasha u qalmo.

S8. Miyaa shaqaalaha barnaamijka dugsiga kadib ah la tallaali karaa?

J8. Tixraac liiska dhammaystiran ee barayaasha u qalmo.

S9. Miyaa barayaasha dugsiyada gaarka ah iyo kuwa dugsiyada dadweynaha si kala duwan loola dhaqmi doonaa?

J9. Maya. Barayaasha dugsiyada gaarka ah iyo kuwa dadweynaha hadda tallaalka way qaadan karaan.

S10. Sidee bixiyayaasha daryeelka ilmaha loo wargalin karaa marka tallaalka la heli karo?

J10. Haddii aad tahay shaqaale daryeelka ilmaha, loo-shaqeeyayaashu wuxuu kugu xiri doonaa macluumaadka ku saabsan muddaynta tallaalka. Haddii aad tahay loo-shaqeeye shaqaalaha daryeelka ilmaha, ama bixiye guriga caruurta ku haya, degmadaada ama saaxiib tallaalka deegaanka ah oo kale ayaa kula soo xiriiri doona si uu kuu siiyo macluumaad si uu kuugu qabto ballan lagu tallaalo adiga iyo shaqaalahaaga. OHA sidoo kale waxay si joogto ah usoo dhigaysaa macluumaad ku saabsan Tallaalka COVID-19 websaytka, baraha bulshada iyo warbaahinta, waxayna bixiyayaasha tallaalka siineysaa macluumaad ku saabsan jadwalka wajiyada tallaalka ee soo socda.

S11. Sidee ayaan ku ogaan karaa sida tallaalka looga helo degmadayda?

J11. Maamulada caafimaadka dadweynaha waxay si dhaw ula shaqaynayaan saraakiisha waxbarashada, isbitaalada, nidaamyada caafimaadka, khayraadka daryeelka ilmaha iyo hay'adaha gudbinta iyo hay'adaha waxbarashada si ay u bixiyaan fursadaha tallaalka ee loogu talogalay barayaasha iyo bixiyayaasha daryeelka ilmaha. Degmooyin badan ayaa horey u bilaabay qorsheeynta, halka kuwa kalena ay wali tallaalayaan bulsho-waynta 1A. Waxaanu kaa codsanaynaa inaad samir yeelato, sugto waqtigaaga, iyo inaad tilmaamo ka hesho dugsiga iyo saraakiisha waxbarashada.

S12. Waa maxay aqoonsiga (ID) aan u baahanahay inaan soo qaato si aan u caddeeyo inaan u shaqeeyo bixiye daryeel ilme, xarunta waxbarashada carruurnimada hore ah ama dugsi K-12 ah?

J12. Ma aha khasab inaad tusto caddayn ah inaad tahay bare ama bixiye daryeelka ilmaha, in kastoo bixiyayaasha tallaalku ay ku waydiisan karaan inaad si uun u caddayso inaad mutaysatay.

S13. Ma u baahanahay inaan lahaado caymis si aan tallaal u helo?

J13. Wakhtigan la joogo, tallaalka waxaa qof kasta lagu siin doonaa bilaa lacag umana baahnid inaad keento caddayn caymis caafimaad. Bixiyayaasha tallaalka lacag kama qaadi karaan dadka ay tallaalka siinayaan. Haddii aad leedahay caymis caafimaad, fadlan soo qaado kaarkaaga caymiska. Bixiyaha tallaalku waxa dhici karta inuu caymiskaaga ku dallaco khidmadda siinta tallaalka. Bixiyeyaasha tallaalka waxay dib uga heli karaan khidmadaas shirkadda caymiska ee dawladeed ama gaarka loo leeyahay ee bukaanka, ama haddii uusan bukaanku caymis ku jirin, waxay ka heli karaan Sanduuqa Taakulaynta Bixiyaha ee Maamulka Dhigaalada iyo Adeegyada Caafimaadka.

S14. Waa imisa lacagta kaaga baxaysa inaad tallaal hesho?

J14. Imminka, garoojooyinka tallaalada waxaa lagu siin doonaa qof walba si bilaash ah. Bixiyayaasha tallaalku waxay ku dallaci karaan caymiskaaga khidmadda booqashada laakiin shakhsiyaadka kama qaadi karaan lacagta tallaalka. Bixiyeyaasha tallaalka waxay dib uga heli karaan khidmadaas shirkadda caymiska ee dawladeed ama gaarka loo leeyahay ee bukaanka, ama haddii uusan bukaanku caymis ku jirin, waxay ka heli karaan Sanduuqa Taakulaynta Bixiyaha ee Maamulka Dhigaalada iyo Adeegyada Caafimaadka.

S15. Ma koox ayaa tallaalka la hor siinayaa (tusaale ahaan, macallimiinta dugsiga K-12 ka hor darawalada basaska)?

J15. Degmo dugsiyeedyada, nidaamyada caafimaadka iyo maamulada caafimaadka dadweynaha ee deegaanku waxay ka wada shaqaynayaan in mudnaan si gaar ah loo siiyo tallaalka barayaasha si loo taageero in dugsiyada dib loo furo. Isdabagalintu waa go'aan deegaan. Waxay qaadan doontaa wakhti in la tallaalo barayaasha oo dhan sababtoo ah tallaalka fadaraalka ee la heli karo ayaa xaddidan. Way adag tahay in la sugo laakiin fadlan waa inaad waqtigaaga sugto. Degmooyinka qaar ayaa wali ku jira tallaalka bulsho-waynta 1a.

S16. Goorma ayuu tallaalku diyaar u noqon doonaa bixiyayaasha daryeelka ilmaha?

J16. Bixiyayaasha daryeelka imaha iyo barayaasha waxbarashada hore waxay heli karaan tallaalka laga bilaabo Janaayo 25, 2021. Maadaama aanu jirin tallaal ku filan oo si dhakhso ah loogu tallaalo barayaasha oo dhan, waxaanu kaa codsanaynaa samir. Fadlan ha wicin xafiiska dhakhtarkaaga ama bixiyaha daryeelka caafimaadka wixii su'aalo ku saabsan goorta lagu tallaali karo.

S17. Ma ku laasimi karaa shaqaalahaygu inay tallaalka qaataan?

J17. Wakhtigan la joogo, OHA shardi kagama dhigayo tallaalka COVID-19 dad gaar ah ama dadka ku sugan meel shaqo ka socoto. Shuruudaha shaqaalayntu waxay hoos yimaadaan kormeeridda Xafiiska Shaqaalaha iyo Warshadaha (Bureau of Labor and Industry (BOLI)). Wixii su'aalo ah ee la xiriira COVID-19 booqo websaytka BOLI.

Su’aalaha Bixinta Tallaalka

S18. Maxaa dhacaya kadib marka la i tallaalo?

J18. Wali waxaad u baahan doontaa inaad xirato afsaab oo aad dadka kalena ka dheeraato xitaa markii si buuxda laguu tallaalo, ugu yaraan wakhti xaadirkan. Tallaalada la heli karo waa kuwa u baahan in la qaato laba marqaadasho. Waa inaad la hadasho bixiyahaaga tallaalka si aad u ogaato sida aad u heli karto warbixinada ku saabsan marka aad uqalanto inaad hesho marqaadashada labaad ee tallaalka. Soo dejiso app-ka V-safe, kaasi oo bixiya xaadirin caafimaad oo shakhsiyeed kadib markii aad hesho tallaalka. V-safe sidoo kale wuxuu ku xasuusin karaa inaad hesho marqaadashada labaad. Waxaanu kugu boorinaynaa inaad sii waddo booqashada websaytka CDC si aad uga hesho hagitaano cusub.

S19. Ka waran haddii aan u baylaho COVID-19 kadib tallaalkaygii koowaad?

J19. Dadku waa inay sii wadaan raacitaanka hagitaanka karantiilka iyo go’doominta ee hadda jira xitaa markii ay dadku qaataan marqaadashada koowaad ee tallaalka. Maamulka Caafimaadka Oregon, Waaxda Oregon ee Waxbarashada (Oregon Department of Education (ODE)) iyo Qaybta Waxbarashada Hore ee Oregon waxay cusboonaysiinayaan hagitaanka ku saabsan sida loo waajaho u baylaha COVID markii dadku si buuxda u tallaalan yihiin. Waad inaad hesho wixii soo kordha adigoo adeegsanayo ODE iyo ELD.

S20. Muddo intee le’eg ayaan u baahanahay in la iga war hayo kadib markii la i tallaalo?

J20. Waxaa lagaa war hayn muddo ah 15-30 daqiiqo.

S21. Waa maxay saamaynaha xun ee badanaa/islamarkaa dhaco?

J21. Sida laga soo xigtay Maamulka Cuntada iyo Daawada, waxydhimaalada ugu badan ee lagu ogaaday tijaabooyinka tallaalka COVID-19 waxaa ka mid ah xanuun, guduudasho ama bararka goobta duriinka, daal, madax-xanuun, qarqaryo, murqo-xanuun iyo kalagoysyo xanuun.

S22. Ayaan wacaa haddii aan leeyahay saamayno xun - ma goobta tallaalka mise bixiyahayga?

J22. Saamaynaha xun waa wax caadi ah kadib tallaalka COVID. Haddii aad ka cabanayso saamayno xun kadib markii aad ka baxday goobta tallaalka, waa inaad la xiriirto bixiyahaaga daryeelka caafimaad ama aad tagto xarunta daryeelka degdegga ama gurmadka ah. Waxaanu kugu boorinaynaa inaad sii waddo booqashada websaytka CDC si aad uga hesho hagitaano ku saabsan waxa ay tahay inaad filato kadib tallaalka.

Q23. Miyaan u baahanahay inaan sii wado xirashada afsaabka iyo inaan dadka kale ka dheeraado?

J23. Haa. Wali waxaad u baahan doontaa inaad sii waddo inaad xirato afsaab, si joogto ah u dhaqdo gacmahaaga oo aad dadka kalena ka dheeraato xitaa markii si

buuxda laguu tallaalo ugu yaraan wakhti xaadirkan. Ammuuruhu sidii caadiga ahaa ku laaban maayaan ilaa dad badan la tallaalo. Haddii aynu dhammaanteen wada shaqayno, hore ayeynu u gaari halkaas, inta aynu ku soconana nololo ayaa badbaadi. Waxaanu kugu boorinaynaa inaad sii waddo booqashada websaytka CDC si aad uga hesho hagitaano cusub.

S24. Waxaan isku dayey inaan tallaal qaato oo waa la i celiyey/la ii sheegay inaan taariikh kale soo noqdo. Waa maxay sababta ay tani u dhacayso?

J24. Saraakiisha dugsiyada, loo-shaqeeyayaasha, ama saraakiisha gobolka ama deegaanka ayaa kuula soo xiriiri doona wixii ku saabsan fursadaha tallaalka ee loogu talogalay barayaasha iyo bixiyayaasha daryeelka ilmaha. Wakhtigan ma jiro tallaal ku filan oo lagu tallaalo barayaasha oo dhan mar kaliya. Degmooyinka qaar ayaa wali ku jira tallaalka bulsho-waynta 1A. Waxaanu codsanaynaa inaadan la xiriirin isbitaalada iyo nidaamyada caafimaadka. Way dhici kartaa inaad xaadirto munaasabadaha tallaalka ama aad tagto goobaha tallaalka ee si cad loogu talogalay barayaasha. Way adag tahay in la sugo laakiin waxaanu kaa codsanaynaa inaad waqtigaaga sugto.

Wixii ah su'aalo ku saabsan tallaalka COVID-19, guji halkan.

Helitaanka dukumiintiga: Wixii shakhsiyaadka naafada ah ama shakhsiyaadka ku hadla luuqad aan aheyn Ingiriisi, OHA waxay ku bixin kartaa warbixinta qaabab kale sida fasiraadaha, daabacadda balaaran, ama farta indhooleyaasha. Kala xiriir Xarunta Macluumaadka Caafimaadka 1-971-673-2411, 711 TTY ama COVID19.LanguageAccess@dhsoha.state.or.us.